


# Baaritaanka dhiigga ee ciribta laga qaado ee ilmaha dhashay ayaa badbaadin kara nolosha ilmahaaga



## Sabab?

Baaritaankan dhiigga ee gaarka ah waxaa lagu ogaan karaa cilladaha dhif iyo naadirka ah ee keeni kara naafanimada ama dhimashada haddii aan xilli hore la daawayn.

## Ciddee?

Sharciga gobolku wuxuu dhigayaa in bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ay ka qaadaan laba muunadood oo baaris lagu sameeyo ilmo kasta oo ku dhasha gobolka.

## Goorma?

Baaritaanka koowaad waa in la qaado marka ilmuhu jiro qiyaastii 24 saacadood. Baaritaanka labaad waa in la qaado marka ilmuhu jiro qiyaastii laba toddobaad. Haddii aad hayso, u gee kaarka baarista labaad bixiyaha daryeelka ilmahaaga marka ugu horraysa ee aad booqato dhalashada kadib.

## Sidee?

Dhawr dhibcod oo dhiig ah oo laga qaaday ciribta ilmahaaga ayaa lagu dul dhiciyaa waraag baaritaan oo gaar ah.



## Ka waran natiijooyinka baaritaanka?

Waydii natiijooyinka baaritaanka daryeel-bixiyaha caafimaad ee ilmahaaga. Baaritaan kale ayaa mararka qaar loo baahan karaa sababo kale awgood. Hadduu ilmahaagu u baahan yahay baaritaan dheeraad ah, waxaa muhiim ah in si degdeg ah loogu dhaqaaqo. Haddii loo baahdo, daawaynta waa in sida ugu dhakhsaha badan loo bilaabo.

## Ka-dhaafitaano ayaa jira

Waxaad dooran kartaa in aan ilmahaaga yar la baarin sababo gaar ah dartood. Haddii lagu sheego inaad lacagta baaritaanka iska bixiso, waxaad u qalmi kartaa in lacagtaas lagaa dhaafo. Booqo [bit.ly/nbs-exception](http://bit.ly/nbs-exception) si aad u hesho faahfaahin dhammaystiran.

## Wixii macluumaad dheeri ah

- La hadal dhakhtarkaaga, umulisadaada ama kalkaalisadaada.
- Booqo mareegta soo socota:

**Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka Oregon** [www.healthoregon.org/nbs](http://www.healthoregon.org/nbs)

**Baby's First Test (Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka)** [www.babysfirsttest.org](http://www.babysfirsttest.org)

## Tusaalayaasha xaaladaha la baaro

- Biotinidase Deficiency (Biyotin-yarida)
- Congenital Adrenal Hyperplasia (Cilladaha Lagu Dasho ee Qanjirada Kelyaha)
- Congenital Hypothyroidism (Cilladaha Lagu Dhasho ee Shaqayn La'aanta ama Maqnaashaha Qanjirka Tayroodhka)
- Cystic Fibrosis (Cilladaha Qanjirada Dheecaanada iyo Dhididka)
- Galactosemia (Cillada Hiddo-raaca ee Dheefshiidid La'aanta Galaktowska)
- Phenylketonuria (PKU, La'aanta Jirka Falgal-dedejiyaha Burburiya Amino Aasiidhka)
- Sickle Cell and Other Hemoglobinopathies (Dhiig-yarida iyo Cilladaha Kale ee Dhiigga ee La Kala Dhaxlo)
- Severe Combined Immunodeficiency (Cilladaha Hiddo-side ee Daran ee Haddhiska Difaaca Jirka)
- Spinal Muscular Atrophy (SMA, Cilladaha Hiddo-side ee Lafdhabarta iyo Lafaha Xiriiriya Maskaxda iyo Lafdhabarta)
- X-linked adrenoleukodystrophy (X-ALD, Cillada Hiddo-side ee Nidaamka Neerfaha iyo Qanjirada Kelyaha)\*
- Other Metabolic and Lysosomal Storage Disorders (Cilladaha Kale Dheefshiidka Kiimikada iyo Cilladaha Shaqayn La'aanta Xubn-yareyaasha Burburiya Nafaqooyinka Jirka)

\* Baaritaanka xaaladdan waxay bilaabmi doontaa Janaayo 1, 2023 ama kahor.

Dokumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. La xiriir Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka Oregon 503-693-4100 (cod). Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adag yahay.

**Oregon Health Authority**